

My Career Insights

Hagitaan xirfad shaqo oo ku habboon ilmahaaga

Oggolaanshaha ka qaybgalka

Waaxda Waxbarashadu waxay qandaraas kula gashay Australian Centre for Career Education (ACCE – Xarunta Waxbarashada Xirfadda ee Australia) inay siiso helitaanka barnaamijka loo yaqaan My Career Insight dhammaan ardayda jirta 15+ ee dugsiyada khaaska ah ee 9-aad ee dugsiyada dawladda.

My Career Insights ayaa caawin doonta ilmahaaga:

- Inay bartaan wixii ku saabsan xirfadaha iyo kartida ay u keeni karaan xirfad shaqo.
- Wax ka ogow waxyaabaha ku saabsan shaqooyinka ku habboon awoodooda, xiisahooda iyo shakhsiyadooda, iyo maaddooyinka ay ugu baahan yihiin shaqooyinkaas.

Iyada oo qayb ka ah barnaamijka My Career Insights, ilmahaagu waxa uu:

- Dhameystiri doonaa su'aalo online ah oo taxane ah bogga Morrisby ee dugsiyada (ama guriga haddii aan lagu dhammayn karin dugsiyada).
- Heli doonaa Warbixinta Barofaaylka Morrisby oo tusinaysa natiijooyinka su'aalaha, kuwaas oo soo koobaya waxa ay ku wanaagsan yihiin iyo danaha shakhsi ahaaneed iyo wixii markaas lasoo jeediyo ee la xiriira waddooyinka xirfadeed iyo fursadaha waxbarasho.
- La kulan 30-daqiiqo khabiiir xirfadle ah oo Morrisby u tababaran, kaasoo u sharxi doona ilmahaaga warbixinta. Waad iman kartaa kulankaan. Fadlan u sheeg dugsiyada haddii aad u baahan tahay adeeg turjubaan oo taleefanka la soo galinayo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka waxaad ka heli kartaa: vic.gov.au/my-career-insights



Macluumaad baraayfasiga ah oo muhiim ah:

Dhammaan macluumaadka ardayga ee ay aruuriso ACCE (ama lammaanahooda, Career Analyst Pty Ltd) waxaa loo maamuli doonaa si waafaqsan Sharciga Ilaalinta Xogta iyo Gaarka ah 2014 (Vic), Xeerka Diiwaannada Caafimaadka 2001 (Vic), Xeerka Diiwaangelinta Dadweynaha 1973 (Vic), Xeerka Qarsoodiga Australia iyo Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (EU) 2016/679).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka ay Wasaaradda Waxbarashadu u ururiso ayna u maamusho macluumaadka shakhsiyeed, kuwaas oo ay ku jiraan gelitaanka, sixitaanka iyo cabashooyinka, tag: Shuruucda baraayfasiga ee dugsiyada education.vic.gov.au

ACCE waxay ku kaydisaa xogta ilmahaaga aaladaha jireed ama adeegyada daruuraha. Kuwaani waxay ku yaalaan gudaha Australia Deegaanada Koonfur-Bari ama Aagga Dhaqaalaha Yurub.

Macluumaadka la aqoonsaday waxay noqon doonaan kuwo ay heli karaan shaqaalaha waaxda cilmi baarista iyo ujeedooyinka qorshaynta.

Ardaydu waxay macluumaadkooda ka heli karaan websaydka barofaaylka Morrisby (<https://app.morrisby.com/>) iyadoo la isticmaalayo tafaasiisha galitaanka. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay raadsadaan sidii ay ku heli lahaayeen, ama ku sixi lahaayeen xogtooda gaarka ah. Ardaydu waxay codsan karaan marin u helka iyo sixitaanka macluumaadkooda iyagoo la xiriiraya support@ceav.vic.edu.au

Waalidka ama daryeeluhu waa in inuu buuxiyaa

Waxaan bixinayaa oggolaanshahayga: (magaca ilmaha)			
si loo dhamaystiro barofaylka Morrisby iyo kulanka dabagalka. Hadii aad saxiixdo, waxaad ogolaatay inaad akhriday Foomka Oggolaanshaha oo aad ogolaatay in la ururiyo macluumaadka shakhsi ahaaneed iyo caafimaadka ilmahaaga ee la ururiyey. Tan waxa ku jiri kara macluumaadka la xidhiidha heerka naafanimada ilmahaaga ama arrimo kale oo saamayn kara awooda ubadkaaga si uu u dhamaystiro barofaayl buuxa.			
Magaca Waalidka/Masuulka oo dhameystiran:			
Saxiixa Waalidka/Masuulka:		Taariikhda:	/ /
Fasalka ardayga (haddii la yaqaan):			

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Morrisby booqo: morrisby.com/morrisby-profile